

Hagaha shaqada & Caawimaada Dhakhliga Manitoba

Ururka Sharciga
Waxbarashada ee Bulshada

Community Legal
Education Association

301-441 Main Street
Winnipeg, Manitoba
R3B 1B4



Buugaan waxaa loogu talagalay xog sharci ah kaliya. Talo ahaan looguma talagalin. Xaalad kasta weey ka duwantahay mida kale, waxayna leedahay arimo sharci oo ugaar ah.

Community Legal Education Association (CLEA) waa urur aan faa'iido doon ahayn. Waxey siiyaan dadka dadka Manitoban xog ku saabsan sharciga.

Maalgaliyayaasha CLEA waxaa ka mid ah:

- Ururka Sharciga ee Manitoba
- Waaxda Cadaaladda Kanada
- Ururka Bulshada Sharciga ee Manitoba
- xubnaha iyo deeq-bixiyayaasha

Maalgelinta qoridda iyo daabacaadda xogtaan waxaa kudeeqay Hayadda "Human Resources Development Canada" (Horumarinta Kheyraadka Aadanaha ee Kanada)



Head off: 117A St. Anne's Rd, Winnipeg, MB R2M 2Z1

| (204)202.6491 |

info@healthyMuslimFamilies.ca

Buuggan waxaa qoray Leo Aniceto (2000) , dib u eegis (2001) Karen Dyck, dib u eegis (2005) Christine Mazur, dib u eegis (2014 / 15) iyadoo la kaashanayo Alexandra Collizza, waxaa dib loo eegay 2023, Karas Elbardisy .

CLEA (Ururka Sharciga Waxbarashada ee Bulshada) waxeey jeclaan lahayd ineey umahad celiso shakhsiyaadka soo socda, kuwaas oo faallooyinkooda iyo soo jeedintoodu ahaayeen kuwo aan laga maarmi karin: Gerardo Aguilar (Xarun Caalami ah); Martha Aviles (Ururka Haweenka soo galootiga ee Manitoba); Barry Burron (Mashruuca Main Street); Jaime Carrasco (Mount Karmel Clinic); Kaniisadda Margaret (Hawlgalka Go Home); Harold Dyck (Shaqaalaha Abaabulida Xarunta Khayraadka); Karen Dyck (Ururka Waxbarashada Sharciga ee Bulshada); Ron Fortier; Eduardo Mendarozqueta (Mount Karmel Clinic); Mervin Moar (Adeegyada Caddaaladda ee Aboriginal Ganootamaage ee Winnipeg, Inc.); Larry Reimer (Kaalmada Shaqaaleeynta iyo Dakhliga); Cathy Sherman (Caawimaad Sharciga ee Manitoba "Legal Aid"); Marlene Vieno (Ururka Manitoba ee dadka naafada ah); Margaret von Lau (Adeegyada Horumarinta Shaqada iyo Waxbarashada ee dadka Cusub)

CLEA waxay bixisaa adeegyo iyo barnaamijyo kala duwan oo macluumaad sharci ah, oo ay ka mid yihiin:

- Daabacaadaha luuqada ee ku saabsan sharciga
- Taleefan bilaash ah oo ka heleyso xog sharci ah (204-943-2305 Gudaha Winnipeg. 1-800-262-8800 wicitaan lacag la'aan, gudaha manitoba, meelaha ka baxsan Winnipeg)
- Aqoon-is-weydaarsi, koorsooyin tababar iyo fasallo sharciga dadweynaha
- Xafiiska Afhayaan wax-qabadka Tabaruca ah ee kooxaha bulshada iyo dugsiyada

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CLEA ama mid ka mid ah barnaamijyadeena, nagala soo xiriir:

Community Legal Education Association

301-441 Main Street

Winnipeg, MB R3B 1B4

Telefoonka: (204) 943-2382

Fak: (204) 943-3600

E-mail: community@communitylegal.mb.ca

© 2015, dib u eegis 2023 Community Legal Education Association (Manitoba) Inc.

Last updated: 24th Jun, 2025

SHAXDA TUSMADA

Horudhac

Waa maxay Barnaamijka Kaalmada Shaqada iyo Dakhliga (EIA)? 6

Sideen ku ogaanayaa haddii aan u baahanahay caawimaad xagga EIA? 6

Geeddi-socodka

Sideen u codsanayaa kaalmada bulshada? 7

Tallaabada 1: La xiriir Xafiiska EIA 7

Tallaabada 2: Ka qeyb gal fadhiga xogta kahor inta aad bilaabin 8

Tallaabada 3: Ka qaybgal wareysi uu kula yeelanayo shaqaalaha 8

Tallaabada 4: Ogolaanshaha barnaamijka EIA 11

Haddii codsigaaga la diido 11

Ma heli karaa gargaar deg deg ah xitaa haddii aanan codsan karin? 12

Miyaan xaq u leeyahay kaalmada bulshada? 12

Waajibaadkaaga:

Miyaan u baahanahay inaan u sheego shaqaalaha EIA inaan uguuray/Ladagay lamaanahay? 14

Haddii aan qof lacag ka helo, miyaan u baahanahay inaan u sheego shaqaalaha kiiskeyga ee EIA? 15

Ka waran hadaan helin caawimaada ilmaha ama caawimaada lamaanaha? 15

Miyaan heli doonaa caawimaad xitaa hadaan katago ama aan uguuro meel kabaxsan Manitoba? 15

EIA miyeey iga rajeyneysaa inaan shaqeeyo ama aan shaqo raadsado? 16

Maxaa dhacaya haddii aanan u hoggaansamin Rajooyinka shaqo?. 17

Xuquuqdaada:

Waa maxay hantida la ii ogolyahay inta aan helayo kaalmada bulshada? 18

Dakhli aan shaqeysan intee le'eg ayaan haysan karaa? 20

Intee baan ka haysan karaa mushaharkayga (bilaha ah) ama mushaharka (saacad laha ah) 21

Noocyada Gargaarka

Guriga:

Cawwimaad inee la eg ka heli kartaa guri ama qeyb dabaq kamid ah oo kiro ah? 22

Bixinta lacagta deboosiga? 22

Goorma ayaa kirada si toos ah loo siinayaa mulkiilaha? 22

Maxaa dhacaya haddii aad leedahay guri? 23

Maxaa dhacaya haddii aad leedahay canshuur baaqi ah? 23

Maxaa dhacaya haddii gurigaagu u baahan yahay dayactir? 23

Baahiyaha Gaarka ah:

Waa maxay gargaarka baahida gaarka ah? 23

Muxuu dabooli karaa Gargaarka baahida gaarka ahi? 24

Baahiyo gaar ah miyaa jirikaro haddii aan shaqeeyo? 25

Daryeeka Caafimaadka

Sideen kuu heli karaa daawooyinka? 26

Sideen ku heli karaa caawimaada daryeelka ilkaha? 26

Sideen ku heli karaa baaritaanka indhaha muraayadaha aragga? 26

Xaq miyaa Uleeyahay telefoon(inaan helo)? 27

Ma heli karaa caawimaadka gaadiidka(Isusocodka)? 27

Waxamay caamidda dhalmda kahor ee Manitoba? 27

Waa maxay Barnaamijka Taageerada Manitoba ee Dadka Naafada ah? 27

EIA(Caamidda Bulshada)Ma dabooli kartaa kharashaadka aaska? 28

Wax ka qabashada dhibaatooyinka EIA

Maxaa dhacaya haddii warqadda lacagta(Jeega) ama Foojarka (Lacagta la xoogdo) uu igalumo ama la iga xado? 29

EIA maiga celinkartaa lacag dheraad ah oo an qaatay? 29

Intee in le'ek ayeey EIA ka jari karta miisaaniyadeyda si aad u bixiyo lacagta dheeriga ah? 29

EIA ma uruurinkartaa lacagahayga dheeriga ah xitaa haddii qaladka dhankooda yahay? 29

EIA u qaadan kartaa dakhligayga kale lacagaha dheraadka ah? 30

Shaqaalahaaga:

Shaqaalahaygu ma igusoo booqankaraa gurigayga? 30

Sirtaada:

Waxaan rabaa inaan ogaado haddii EIA ay hayso macluumaad sax ah oo igu saabsan.

Maxaan sameeyaa? 31

Majiraa kharash haddii aan rabo in aan faylkeyga galo (wax ka ogaado) sida uu qabo

Xeerka Xorriyadda Warfaafinta iyo Ilaalinta Xogta (FIPPA)? 31

Maxaa dhacaya haddii aanan haysan lacag aan ku bixiyo kharashkaas? 32

Dhibaatooyinka Sharciga

Ka waran haddii ay ihaysato dhibaatooyin dhinaca sharciga ah? 32

Maxaa dhacaya haddii qof ii dacweeyo inta kutiirsanahay EIA? 32

Haddii aan guri iibsado anigoo aan ku tiirsaneyn EIA, EIA maigu soo rogi kartaa xayiraad? 33

Racfaanka

Xageen caawimaad u tagaa haddii EIA diido inay i caawiso? 34

Maxaan filan karaa haddii EIA aysan i caawin karin? 34

Goorma ayaan racfaan ka qaadan karaa Guddiga Racfaanka? 34

Racfaanka ma gudbin karaa xili kasta oo aan go'aanka helo? 35

Sidee baan racfaan u qaadanayaa? 35

Mahelikaraa Caamiwad ku saabsan racfaanka? 36

Sideen ku ogaadaa taariikhda dhageysiga(Maxkamadda)? 36

Ma arki karaa caddaynta EIA dhageysiga ka hor? 36

Maxaa ka dhacaya dhageysiga? 37

Racfaan maka qaadan karaa go'aanka Guddiga Racfaanka? 37

Xogata:

Macluumaad sharciyeed 39

Hay'adaha ka caawini kara foomamka EIA 39

Kirada ama Lacagtaha dhigaalka(Diboosiga) 40

Racfaanka 41

Xafiisyada EIA ee Winnipeg 42

Xafiisyada EIA ee ka baxsan Winnipeg 43

HORUDHAC:

Waa Maxay Barnaamijka Kaalmada Shaqada iyo Dakhliga (EIA)?

Barnaamijka Kaalmada Shaqada iyo Dakhliga, oo sidoo kale loo yaqaan 'barnaamijka EIA', waxaa maamula Waaxda Qoysaska ee Dawlad goboleedka. Barnaamijkan EID waa wada ugu dambe ee (Qofka aan haysanin dakhli kale) wuxuu siinayaa dadka Deggan Manitoban cawinaada ku meel gaarka ah marka aysan haysan hab kale oo ay ku mareeyaan nolal maalmeedka, caafimaadka, iyo qareenka. Barnaamijka EIA waxaa kamid ah taageerada Barnaamijka Kaalmada Kirada, kaas oo ka caawiyana kharashka guryaha. Dadka awooda ineey shaqeystaan ee reer Manitoban, ujeedada ugu weyn ee EIA waa in ay caawiso si ay shaqadooda dib ugu laabtaan haddii ay suurtagal tahay. Sidookale dadka ka qayb qaadanaya barnaamijkan waa inay raacaan xeerarka barnaamijka.

Sideen ku ogaanayaa haddii aan u baahanahay caawimaad xagga EIA?

Inta badan gargaarka EIA waxaa loogu yeeraa kaalmada bulshada ama samatabixinta. Ujeeddada faa'iidooyinkani waa in dhammaan dadka daggan manitoba ay helaan baahiyahooda aasaasiga ah ee muhiimka ah iyo inay awood u yeeshaan inay noqdaan kuwo naftooda taageeraya iyadoo loomarayo shaqada iyo tababarka. Waxaad ubaahantahay caawimaad bulsho, haddii aadan awoodin in aad tageertid nafsadaada ama qoyskaaga. Kahor intaadan dalban kaalmada Uma baahnid inaad sugto ilaa wax walb ood leedahay ay kadhamnayaan. Waad codsan kartaa caawimaad haddii aadan xittaa hubin inaad uqalantid. Qof kasta oo Manitoba jooga oo codsada kaalmo dhaqaale wuxuu xaq uleeyahay fursad uu ku dalbado kaalmada bulshada. Haddii aadan hubin inaad Uqalantid iyo in kale, codso.

GEEDI SOCODKA

Sideen u codsanayaa Kaalmada Bulshada?

Tallaabada 1: La xiriir xafiiska EIA

Si aad u codsato gargaar, la xiriir EIA telefoonka 204-948-4000 ama booqo xafiiskooda ku yaala 111 Rorie Street ee Winnipeg.

Haddii aad dooneyso, waxaad weydiin kartaa saaxiib, ama xubin qoyskaga ka tirsan ama qof kale oo aad taqaanid si uu kaaga caawiyo inaad la xiriirtid EIA.

Liiska xafiisyada kale ee EIA ee Winnipeg, kafiiri bogga 42. Liiska xafiisyada EIA ee ka baxsan Winnipeg, fiiri bogga 43.

Marka ugu hore eed kala xiriirto EIA telefoonka, shaqaalaha EIA wuxu:

- Ku kula wadaagi donaa xogta aasaasiga ah oo ku saabsan EIA
- Samey donaa qiimeyn hordhac ah oo ku saabsan in EIA ay tahay caawimaad kugu haboon
- Go'aansan donaa haddii aad u baahantahay kaalmo dhaqaale degdeg ah, hadii aad ubaahantahay, wuuku caawin donaa.
- Go aansa donaa barnaamijka EIA ee kugu haboon.
- Hubin donaa in barnaamijkaas waxyaaba lagaga baahanyahay aad helkartid ama ku khuseeyo.

- Hubin doono diiwaankooda si ay u egaan; (1) Haddii aad hadda qaadatid EIA, ama aad hore u qaadanjirtay EIA (2) In amniga aad khatar ku tahay.
- Waxuu kasiin doonaa balanta kulanka.
- Waxaa lagu cazuumaya fadhiga hagitaanka ee kahoreeya qaadashada barnaamijka, kaas oo ka bixinaya sharaxaad buuxda barnaamijka iyo agabka codsiga. Haddii ay suurogalin fadhiga hegitaanka, waxaad helidoontaa xirmo qoraal ah oo ku saabsan qaadashada barnaamijka. Xirmada waxaa ku jiri doona taariikhda shaqada iyo foomka qorshaha shaqsiyeed ee Shaqo. Buuxi foomla akdib an sooceli xiliga balantaada.
- Wuxuu diiwaangalin doonaa dhamaan balamaha nidaamka jadwalka qorshooyinka ee ah qaabka on-line.
- wuxuu kuu diri donaa caawimaada kale ee kugu habboon.

Talaabada 2 : Ka qaybgal fadhiga hegidda ee ka horeeya kulanka

Haddii aad codsanayso EIA oo hoos timaada waalidka keligiis ah ama qaybta kaalmada guud, **waa inaad** ka qaybgashaa hegidda kahoreya kulanka, waa inaad buuxiso foomamka, xogta shakhsiga iyo Taariikhda Shaqaalaynta iyo Qorshaha Shaqada Gaarka ah ka hor ballanta qaadashadaada. Haddii aadan samayn, ballan qaadashadaada waxaa laga yaabaa in dib loo dhigo.

Haddii lagu siiyo gargaar degdeg ah ka dib markaad la xiriirto EIA, waa inaad ka qaybgashaa kulanka hegidda ka hor balantaada, iyo ka hor inta aanad helin gargaar dheeraad ah.

Haddii aad si buuxda u shaqeysato oo aadan ka qeyb galin kulanka hegidda ee kahoreya balantada, sababtoo laxiriirto isdabamarka jadwalkaaga shaqada, waxaa laga yaabaa in lagaa dhafo inaad timaado. Waxaa jiri kara sababo kale oo kuu cudur daaraya inaad timaadid kulanka hegidda. Kala hadal shaqaalaha EIA wixii macluumaad dheeraad ah.

Xataa haddii lagaa cudurdaarto imaanshaha hanuuninta, waxaa laga yaabaa inaad daneyneysid inaad ka qayb gashid, sababtoo ah hegidda waxay ku siinaysaa macluumaad muhiim ah oo ku caawin doona:

- go'aanso in codsashada EIA ay kugu habboon tahay iyo in kale;
- la xiriir agabka kale ee kugu habboon;
- dib u eeg oo cadee waajibaadkaaga;
- buuxi dukumentiyada codsigaaga;
- u diyaar garoow waraysigaaga qaadashada; iyo
- u hel jawaabaha su'aalahaaga.

Fadhigaaga ka dib, waxaad heli doontaa xidhmo ka kooban codsigaaga iyo foomamka qorshahaaga shaqo, liisaska hubinta iyo agabka kale. Waa inaad ballan wareysi ah ka qabsataa shaqalaha EIA adigoo wacaya (204) 948-4000 gudaha Winnipeg ama la xidhiidh xafiiska EIA ee kuu dhow (ee kuqoran bogagga 42 & 43).

Talaabada 3 : Ka qaybgal waraysiga qaadashada shaqaalaha qaadashada

Wareysiga qaadashada waa qeybta rasmiga ah ee codsigaaga. Waxaad la kulmeysaa shaqaalaha EIA kaasoo la socda macluumaadkaaga ka dibna go'aan ka gaaraya haddii aad u qalantid kaalmada bulshada. Waxaa lagu weydiin doonaa xaalada qoyskaaga, degaanka/Guriga, dakhliga, hantida, waxbarashada, heerka shaqada, xaaladaha caafimaad, iyo dhibaatooyinka la xiriira sharciga.

Kahor intaadan tagin kulanka, waa inaad buuxisaa foomka codsigaaga, oo ay ku jiraan Taariikhdaada Shaqaalaynta iyo foomka Qorshaha Shaqada ee Shakhsi ahaaneed. Xasuusnoow in balanta waraysiga uu dib u dhigi karo shaqaalaha, haddii aanad buuxin dhammaan foomamka ka hor balanta waraysiga. Haddii aad dhibaato kala kulanto buuxinta foomamkaaga, waxaad la xidhiidhi kartaa ururka bulshada ama hay'ada agagaarkaga kuyaalo. Waxa jira liis wakaaladaha taageerada bulshada oo ka bilaabmaya bogga 39 ee buug-yarahaan.

Waa inaad keentaa dukumentiyoo gaar ah waraysiga. Fadlan ka hubi xidhmadaada macluumaadka liiska hubinta waxa la keenayo. Waa inaad keentaa ugu yaraan laba nooc oo aqoonsi oo adiga khuseya iyo laba aqoonsi oo xaaskaaga ama lammaanahaaga sharciga khuseyso, haddii ay codsanayaan kaalmada bulshada. Waxa kale oo lagarabaa ugu yaraan hal warqad aqoonsi oo khuseysa mid kasta oo ka mid ah xubnaha qoyskaaga ee u baahan caawimada. nuqulada kaararka aqoonsiga **lama** aqbaloo. Tusaalooyinka qaar ee aqoonsiga la aqbali karo waa:

- Shahaadada dhalashada;
- Kaarka caymiska bulshada;
- Aqoonsiga darawalnimada ama kaar aqoonsi kale oo leh sawir; iyo
- Baasaboorka.

Soo qaado kuwa soo socda haddii aad haysato:

- Dukumentiyada socdaalka sida Diiwaanka Soo Degista, Aqoonsiga Dacwadda Qaxoontiga ee Heshiiska, Ogolaanshaha Wasiirka ama Ogolaanshaha Shaqada. (Waxaad kuwan ka heli kartaa Xafiiska Jinsiyadda iyo Socdaalka ee 269 Main Street, Suite 400, Winnipeg MB R3C 1B2; waxaad u baahan doontaa inaad ballan samaysatid);
- Kaarka aqoonsiga dadka qaranka ee hore (kaararka heshiiska);

- Aqoonsiga darawalnimada ee Manitoba ee casriga ah;
- Kaarka aqoonsiga ee Manitoba casriga ah;
- Kaadhka lambarka caymiska bulshada;
- Maqnaanshaha ku meel gaadhka ah ama waraaqaha sii deynta
- Foomka diiwaangelinta dhalashada tooska ah
- Aqoonsi kasta ee sawir leh; iyo
- Kaarka Caafimaadka ee Manitoba.

FIIRO GAAR AH: Kaarka Caafimaadka ceymiska iyo Faa'iidooyinka ee Manitoba (MHIBC) iyo Lambarka Aqoonsiga Caafimaadka Shakhsiga ah (PHIN) maaha kaadhahka aqoonsiga laakiin waxaa loo isticmaalaa in lagu xaqiijiyo xubnaha kale ee qoyska marka aan dukumeenti kale la helikarin iyo si loo helo caymis caafimaad. Haddii aadan haysan kaarka caafimaadka ee Manitoba waxaad heli kartaa mid bilaash ah hadaad la xiriirto Manitoba Health (Xafiiska Caafimadka ee Manitoba).

- Waa inaad joogtaa 300 Carlton Street, Winnipeg
- ama wac (204) 786-7101; ama
- Khadka bilaashka ah: 1-800-392-1207;
- Khadka dadka qaba caqabadda maqalka ee Winnipeg TTY/TDD: (204) 774-8618; ama
- Khadka dadka qaba caqabadda maqalka ee ka baxsan Winnipeg TTY/TDD : ka wac Adeegga Gudbinta Manitoba 711 ama 1-800-855-0511.

Waa inaad tustaa dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka u ah taageerada codsigaaga. Tan waxaa ka mid ah caddaynta dhaarta, sida dakhliga, hantida, kaydka, faa'iidooyinka caymiska shaqada, faa'iidooyinka hawlgabka, iyo dheefaha naafada. Si aad u bixiso macluumaadkan, waa inaad keentaa dukumeentiyada soo socda, haddii ay ku khuseeyaan:

- Heshiiskaaga guriga kirada, si qoraal ah, kasso uu saxiixay saxeexay mulkiilaha guriga kirada;
- Haddii aad leedahay gurigaaga: waraaqaha daynta, waraaqaha caymiska guriga, caddaynta canshuurta hantida, foomka lahaanshaha dhulka;
- Haddii aad leedahay guri guurguura: Waraaqaha kirada;
- Haddii aad leedahay guriga is-kaashatada: warqadaha khidmadda guryaha is-kaashatada;
- Biilasha tamarta (tusaale gaaska, biyaha, korontada);
- Haddii aad tahay arday qaan-gaar ah: xaqiijinta imaanshaha iyo habsocodka waxbarashada, caddaynta is-diiwaangelinta, koobiga kaarka warbixinta, diiwaanka imaanshaha waqtigaas, macluumaadka maalgelinta kafaala-qaadka;
- Haddii aad dhawaan ka tagtay shaqadaada: warqadaha mushaharka caadiga ah ee ugu dambeeya, mushaharka fasaxa iyo Diiwaanka Shaqada;

- Haddii aad shaqaynayso: magaca shirkadda iyo warqadda lacag bixinta 30-kii maalmood ee ugu dambeeyay;
- Warqadda/xaanshida ama ogeysiiska lacag bixinta hawlgabka, Qorshaha Hawlgabka Kanada, Naafanimada Qorshaha Hawlgabka Kanada, Agoonta/Xaaska ama faaidooyinka carmalka, Caymiska Shaqada, Magdhawga Shaqaalaha, Dheefaha Caymiska Dadweynaha Manitoba, Lacagaha Masruufka Lamaanaha, kirada ama (guriga iyo cunto) lagu siiyay, xaqijinta faa'iidooyinka caymis kastoo kale, caddaynta ilaha kale ee dakhli;
- Warbixinta bangiga/diwaanka wax kala iibsiga ee 60-kii maalmood ee la soo dhaafay iyo dhammaan akoonnada bangiga ee kuqoran magacaaga;
- Xaqijinta warqad cadeyneysa xiridda koontada bangigaaga.
- Caddaynta hantidaada: baabuurta yarar, baabuurta waaweyn, SUV's, mootooyinka, agabka barafka(lagukaxeeyo), agabka badda loo isticmaalo, doonida, baabuurta kale, guri, dhul, agabka gawaarida lagudabaxiro, aqal, qorshaha aaska, Qorshaha kaydinta hawlgabka ee diiwaangashan, lacagaha kaydka ee canshuur la'aanta ah ee bangiga, boonada, lacagta dhigaalka, shahaadooyin wada lahaanshaha, Shahaadooyinka Maalgashiga la damaanad qaaday, lacagta caddaanka ah ee bangiyada, siyaasadaha lacagta caymiska, maalgelinta bangiga wadaagga
- Haddii aad sheegtay khasaaro dhaqaalo shantii sano ee la soo dhaafay: koobiyada dukumentiyada;
- Haddii aad wareejisay hanti ama hanti maguuraan ah shantii sano ee la soo dhaafay: nuqullada dukumentiyada;

EIA waxa kale oo laga yaabaa inay ku weydiisato inaad bixisid waxyaabaha soo socda:

- Haddii aad ku jirto xabsi shardi ah ama sii-deyn shardi ah, fadlan keen nuqul rasmi ah oo ka mid ah Amarka Aqoonsiga (Recognizance Order);
- Xaqijinta inaad codsatay Faa'iidooyinka Caymiska Shaqada. Waxaad midan ka heli kartaa 391 York Avenue, Winnipeg ama telefoon bilaash ah 1-800-206-7218 (TTY: 1-800-529-3742); iyo
- Haddii aad shaqadaada uga tagayso sabab caafimaad: warqad dhakhtar oo qeexaysa baahida aad shaqada uga tageysid iyo marka lagaa filayo inaad ku soo laabatid shaqada.

Haddii aadan haysan dhammaan dukumeentiyada aad u baahan tahay, shaqaalaha balanta kahor ayaa laga yaabaa inuu ku weydiiyo inaad baxdid ood soo qaadatid cadeumaha ka dibna ad usoo laabatid ballan kale.

Tallaabada 4 : Ogolaanshaha barnaamijka EIA

Haddii aad u qalantid barnaamijka EIA, shaqaalaha qaabilaada ayaa kuu sheegi doona nooca gargaarka aad heli doontid. Adiga iyo shaqaalaha waxaad ka shaqayn doontaan oo aad ku heshiin doontaan **qorshe hawleed**. Qorshe hawleedka, waxaad ku heshiin doontaa inaad sameyso waxyaabo gaar ah si aad u sii heshid kaalmada. Shaqaalahaaga qaadashada ayaa sidoo kale u gudbin doona faylkaaga iskuduwaha kiiska kaas oo kuudiri doona mid ka mid ah xafiisyada gaarka ah ee EIA.

Haddii codsigaaga la diido

Haddi uu shaqaalaha qaabilaada kuu sheego inaad codsan karin sababtuna tagay inaad uqalmin gargaar, waxaad wali ku adkaysan kartaa inaad soo gudbiso codsi. Xaq ayaad uleedahay inaad dalbatid. Haddii codsigaaga la diido, waxaad rafcaan udirsan kartaa Guddiga Adeegga Bulshada. Fadlan eeg bogga 34 si aad u heshid macluumaadka ku saabsan sida rafcaanka loo qaato.

Ma heli karaa gargaar degdeg ah xitaa haddii aanan codsan karin?

Waxaa laga yaabaa inaad heli kartid gargaar degdeg ah xitaa haddii aanan codsan karin, laakiin EIA waa inay go'aan ka gaarto haddii aad runtii u baahan tahay gargaarka degdegga ah ama caawimaad degdeg ah.

Caawimada degdega ah waxaa ka mid noqon kara:

- foobar cunto;
- Tigidhada baska;
- hoy ku meel gaar ah;
- xafaayadda; ama
- dawo.

Taageerada daawadaada.

Si aad gargaar degdeg ah uga hesho Winnipeg, waxaad booqan kartaa xafiiska EIA ee 111 Rorie Street, ama wac (204) 945-0183 gudaha Winnipeg ama wac khadka bilaashka 1-866-559-6778. Kaalmada maaliyadeed ee muddada gaaban waxa la ogolaan karaa ugu badnaan 14 maalmood markiiba.

Miyaan u qalmaa gargaarka bulshada?

Si aad u hesho EIA, waa inaad ku gudubtaa laba imtixaan: imtixaanka **u-qalmitaanka maaliyadeed** iyo imtixaanka **u-qalmitaanka qaybsan**.

1. U qalmida dhaqaale : *Dhaqaale ahaan* ayaad u qalantaa haddii **ilahaaga dhaqaale** aanay ku filnayn daboolida baahiyahaaga aasaasiga ah. Ilahaaga **dhaqaale**

waa dhammaan waxyaabaha aad leedahay, marka laga reebo qaar ka mid ah (xaaladaha qaar), iyo dhammaan dakhliga aad ka heshid meel kasta. Sharcigu waxa uu qeexayaa kharashka baahiyahaaga aasaasiga ah iyo heerka caawimada ee laga yaabo in lagu siiyo. EIA maraacaaci doonto xisaabintaada maaliyadeed. Shaqaaluhu waa inay raacaan qaddarka sharcigu dhigayo.

2. U-qalmitaanka Qaybta macnaheedu waa inaad ka tirsan tahay mid ka mid ah kooxahan soo socda:

- a) **Jirrada Jirka ama Maskaxda** – ma awoodid inaad hesho dakhli aad ku daboosho baahiyahaaga aasaasiga ah ama ma awoodid inaad daryeesho naftaada iyo inaad u baahan tahay qof ama hay'ad kale oo ku xanaaneeyo waxaana ay u badan tahay in xanuunku uu soconayo muddo ka badan hal (1) sano. Guddi ayaa go'aamin doona in aad u qalanto iyo in kale. go'aankooda wuxu kusaleysnaan donaa caddaynta aad ugudbisay. Tusaale ahaan, waxaad ugeyn kartaa warbixin caafimaad oo uu saxeexay dhakhtarkaagu.
- b) **Carmallada** – waxaad tahay xaas laga dhintay oo leh hal caruur ama badan kuwaas oo kugu tiirsan.
- c) **Waxaad leedahay carruur kugu tiirsan iyo -**
 - a. In aad tahay kaligaa ama aad gooni unooshahay/ meel ka baxsan lamaanahaaga;
 - b. Saygaaga/xaaskaaga ayaa laga xukumay oo uu ku kujira xabsi;
 - c. Ma aadan guursan; ama,
 - d. Waa lagu furay/kala tagteen.
- d) **Da'da yar iyo carruurta** - waxaad kaheshaa daryeel qof weyn oo aan ahayn waalidkaaga ama dadka masuulka ka ah
- e) **Dadka leh qof ku tiirsan oo u baahan daryeel gaar ah .**
- f) **Dadka u baahan ilaalin oo degan xarunta xallinta/ faragalinta dhibaatooyinka.**
- g) **Da'da** - waxaad tahay 65 jir ama ka weyn oo aad uqalmin ama aadan hadda qaadanin faa'iidooyinka Dakhliga Da'da ee Faderaalka (OAS) ama Dakhliga la damaanad qaaday (GIS).
- h) **Kiisaska gaarka ah** - tusaale ahaan, waxaad ka yar tahay 18 kaligiisa nool.
- i) **Caawinta guud** - Haddii aadan kamid aheyn mid ka mid ah qaybaha kale waxaad ku haboonaan kartaa qaybta kaalmada guud.

Markaad heleysid barnaamijka EIA, EIA waxay dib u eegi doontaa faylkaaga ugu yaraan hal mar sannadkii iyo inkabadan halmar.

WAAJIBAADKAAGA

Miyaan u baahanahay inaan u sheego shaqaalahayga EIA inaan hadda ladagay lammaanahayga?

Waxaa waajib kugu ah inaad u sheegtid shaqaalaha isbeddellada ku dhaca xaaladdaada kukhuseeya isla markaas. Isbeddelladani waxay saamayn karaan u-qalmitaankaaga qayb ahaan iyo maaliyadeed labaduba. Tusaale ahaan, marka aad keligaa la nooshahay carruurtaada, EIA waxaa laga yaabaa inay kugu diiwaangeliso qaybta waalidka keligiis ah. Haddii aad la nooshahay lamaane ama lammaanaha nolosha aad wadaagtaan, waxaa lagu wareejin doonaa qaybta kaalmada guud, taas oo wax ka beddeli karta miisaaniyaddaada.

EIA waxay u magacaabi doontaa xidhiidhkaaga sharci guud xaaladaha soo socda:

- **Xiriirka sharciga guud ee iskii isku aqoonsaday:** Dhammaan lammaanayaasha iskood isku aqoonsaday waxaa loola dhaqmi doonaa ineey isqabeen ookale sababo laxiriira faa'iidooyinka EIA owgeed.
- **Deganaanshaha wadaaga iyo is dhexgalka qoyska:** Dhammaan dadka qaangaarka ah ee u waalidka caruur siwada jirna u maareeya nolosha midba midka kale, iyo carruurta guriga waxaa loola dhaqmi doonaa ineey isqabeen ookale sababo laxiriira faa'iidooyinka EIA owgeed.
- **Muddada deganaanshaha ee la wadaagaa:** xiriirka wada-noolaanshaha dadka waaweyn ee kale ee aan qoyska ahayn, lamaanaha sharciga-guud ayaa loo aqoonsan doonaahadii aay wadaagaan degaanka saddex bilood oo isku-dar ah lix bilood gudahood. Marka la go'aaminayo haddii loo aqoonsado lamaane sharciga-guud o, EIA sidaas ayeey utixgelin doontaa:
 - o **Isku-tiirsanaanta qoyska/bulshada** : taas oo ah heerka ay labada qof ee qaan-gaarka ah ee wada nool ay ula xiriiraan qoyska, asxaabta, iyo bulshada ka lammaane ahaan halkii ay ahaan lahaayeen laba qof oo wadaaga guri.
 - o **Isku-tiirsanaanta maaliyadeed** : taas oo ah heerka ay labada qof ee qaan-gaarka ah ee isla nool ay isku taageeraan dhaqaale ahaan.

Haddii lamaanahaaga uu shaqeeyo, inaad waxay saameyn kartaa uqalmidda dhaqaale, sababtoo ah waxaad haysataa qof qoyskaaga ka mid ah oo kaa caawin kara kharashka qoyska.

Waa inadan sugin EIA inay dib u eegto faylkaaga ka hor intaadan u sheegin isbeddelkan. Sharci ahaan waa inaad ogeysiisaa EIA isbedel kasta oo ku yimaadda xaaladaha bedeli

kara xaqa aad u leedahay dheeftaada. Waxaad haysataa 30 maalmood laga bilaabo markuu isbeddelkaas dhacay. Haddii aadan yeelin, waxaa lagugu soo oogi karaa dambi waxaana lagugu ganaaxi karaa ilaa \$5,000.00 ama waxaa lagu xidhi karaa ilaa saddex (3) bilood.

Haddii aan lacag ka helo qof, miyaan u baahanahay inaan u sheego shaqaalahayga EIA?

Inaad lacag ka hesho ilo aan ahayn EIA waxay saamayn kartaa u-qalmitaankaaga dhaqaale. markastood lacag hesho, waxa yaraanaya kaalmada EIA ay ku siin karto. Tani waa sababta oo ah EIA waxay bixisaa oo kaliya baahiyaha aasaasiga ah ee aadan awoodin. Lacagtu waxay ka iman kartaa Autopac, Caymiska Shaqada, Qorshaha Hawlgabka Kanada, Dhaxal, qaraabo, saaxiib ama ilo kale.

Waa inaad sugin inta EIA ay dib u eegayso faylkaaga ka hor inta aanad u sheegin in lagu siiyay lacag. Waa waajibkaga inaad isla markiiba u sheegtid iyaga. Sharcigu waxa dhigayaa inaad ogeysiiso EIA isbedel kasta oo ku yimaadda xaaladaha bedeli kara xaqa aad u leedahay dheeftada. Waxaad haysataa 30 maalmood laga bilaabo markuu isbeddelkaas dhacay. Haddii aadan yeelin, waxaa lagugu soo oogi karaa dambi waxaana lagugu ganaaxi karaa ilaa \$5,000.00 ama waxaa lagu xidhi karaa ilaa saddex (3) bilood

Wax kasta oo aad hesho ma saameenayaan miisaaniyadaada. Tusaale ahaan, EIA kuma dari karto ilaha dhaqaale sida "hantida dareeraha ah" ee lagcafiyay. aad bogga 18 si aad u heshid xog dheeraad ah oo ku saabsan hantida dareeraha ah.

Maxaa dhacaya haddii aanan helin masruufka ilmaha ama xaaska?

Haddii aad leedahay heshiis ama amar maxkamadeed si aad u hesho masruufka ilmaha ama xaaska, waa inaad cadeysaa waraysiga balanta. EIA waxay ku waydiin doontaa qadarka lagugu talagayay inaad gaadatid iyo inaad taageerada weli lagu soo diro. Haddii aadan haysanin heshiis ama amar maxkamadeed, EIA waxay ku weydiin doontaa su'aalo ay ku go'aamineyso inaad xaq u leedahay inaad heshid taageeradan. Adiga iyo shaqaalaha waxaad isla samayn doontaan qorsha hormarinta iyo maareynta qoyska. Qorshuhu wuxuu sheegayaa tallaabooyinka aad raaci doontid si aad taageero uga heshid waalidka kale ee ilmahaaga ama lamaanahagii hore oo ay tahay inay ku siiso lacagta ilmaha ama masruufka lamaanaha. EIA waxay kaa filaysaa inaad samayso dadaal macquul ah si aad u raacdid qorshahan. Haddii aad ka welwelsan tahay la xiriirida waalidka kale ama lamaanhaagii hore si aad uga heshid taageero ay saameyn ku yeelan karto badbaadadaada, u sheeg shaqaalahaaga cabashadaada.

Weli ma heli doonaa gargaar xitaa haddii aan ka tago ama aan ka guuro meel ka baxsan Manitoba?

Maya, kaliya dadka deggan Manitoba ayaa gargaar ka heli kara Manitoba.

Haddii aad u guurto meel ka baxsan Manitoba, kama heli kartid caawimo Manitoba. Tani waxay dhaqan galaysaa maalinta koowaad ee bisha kadib markaad ka guurto gobolka. Haddii aad u safrayso meel ka baxsan Manitoba, waxaad waayi doontaa kaalmada haddii aad maqanaatid 30 maalmood oo isku xiga. Waxaad mar kale codsan kartaa markaad soo noqotid, laakiin waa inaad martaa habka qaadashada caadiga ah. Mararka qaarkood, EIA waxay kuu ogolaan kartaa inaad maqnaatid in ka badan 30 maalmood (tusaale ahaan daawaynta, baxnaaninta ama xiisadda qoyska). Kala hadal shaqaalahaaga sababta aad u baxayso.

EIA miyay iga filaysaa inaan shaqeeyo ama shaqo raadsado ?

EIA kaama filayso inaad shaqeeyso ama aadraadisid ama u tababartid shaqo, haddii:

- Si ku meel gaar ah aanad awoodin inaad shaqeeyso sababo laxiriira naafo xaga jirka ama maskaxda,
- Aad ka weyn tahay 65,
- Aad haysid qof kugu tiirsan, oo ka weyn lix jir, oo u baahan daryeel gaar ah,
- Waxaad ku jirtaa xarunta wax ka qabadka xanaanada ama waxaad iska diiwaan gelisey EIA isla markaad kabaxday xaruntaas.
- Waxaad tahay waalid keligiis ah oo leh ugu yaraan hal ilmo oo kayar lix jir, marka lagareebo hadii aad qaadatid EIA adigoo kujira waxbarashada ama tababarka shaqada,
- Waxaad tahay waalid keligiis ah oo aan qaan gaarin, kunajira saddexda bilood ee ugu dambaysa xiliga uurka.
- Waxaad tahay 16 ama 17 jir laakiin dhigato dugsi ama barnaamij tababar kasoo ah wakhtiga buuxa(sida: Subax ilaa galab),
- Waxaad xaq u leedahay fasaxa daryeelka naxariista ee hoos yimaada Xeerka Heerarka Shaqada ee Manitoba. (Fasaxa daryeelka naxariistu waxa uu ilaaliyaa shaqada shaqaalaha marka la daryeelayo xubin qoyska ka mid ah oo qaba xaalad caafimaad oo halis ah taasoo si weyn usababi karta dhimasho 26 toddobaad gudahood).

Haddii aad shaqaynayso ama laga rajaynaya inaad shaqayso, waa in aad tustaa shaqaalaha EIA in aan lagaa eryin, ka tegin, ama aanad diidin shaqo sabab la'aan. Sidoo kale waxaa waajib kugu ah inaad ku waayin shaqadaada sababo laxiriira dhaqankaaga

mas'uuliyad darrada ah, tusaale ahaan, in shaqada lagaa eryo sababtuna tahay inaad soo xaadirin shaqada. Waxaa kugu waajib ah inaad diidin shaqo kasta oo macquul ah.

Ma diidi kartid shaqo lagu soo bandhigay hadii sababtu tahay in qofka loo shaqeynaya uu bixinayo mushahar qadarka ugu yar. Haddii adiga iyo shaqaalaha (EIA) aad go'aansataan inaad heshid waxbarasho ama tababar dheeraad ah oo qayb ka ah qorshahaaga shaqo, waxaa waajib kugu ah inaad taas samayso.

(Just cause)"Sababta kaliya" macnaheedu waa sababaha shaqada laisaga eryo, joojinta, ama diidmada shaqada aan saameyn doonin u-qalmitaankaaga EIA. (Just cause)"Sababta kaliya" waxaa ka mid ah:

- khilaaf ku saabsan mas'uuliyadaha shaqsi/qoys/waxbarasho;
- shuruudaha shaqada oo ku xad-gudbaya halbeegyada shaqaalaynta gobolka ama soo bandhigaya diidmo damiir ama sharci;
- Xaaladaha caafimaadka iyo badbaadada;
- dhibaatayn iyo takoorid; ama
- xaalado kale oo EIA ay u aragto inay sabab u sabab tahay.

Haddii aadan muujin karin (Just cause) "sabab kaliya", waxaa laga yaabaa inaad u qalmin dheefta EIA ama in faa'iidooyinkaaga la dhimi (waxay kuxirantahay heerka qeybta sida ad ugu qalantid).

Maxaa dhacaya haddii aan u hoggaansami waayo rajada shaqada? (Filashada lagaa filayo inaad shaqeysid)

Haddii aadan u hoggaansamin filashada(Rajada ah inaad shaqeysid) shaqo lix bilood gudahood markaad codsatid EIA, EIA waxay diidi kartaa, yareyn kartaa, joojin kartaa ama soo gabagabeyn kartaa kaalmadaada. Dhimista dheefaha macnaheedu waa in EIA ay ka jari karto miisaaniyadaada \$50 bille ah. Haddii aad u hoggaansami weydo waajibaadkaaga sababo la xiriiro in qorshe hawleedkaagu yahay mid aan macquul ahayn ama aan aheyn mid hirgalaya, waa inaad kala hadashaa shaqaalaha inuu kuu beddelka qorshahaga.

XUQUUQDAADA

Waa maxay hantida la ii ogolyahay markan qadanayo kaalmada bulshada?

Haddii aad guri leedahay:

Marka la xisaabinayo ilahaaga dhaqaale, EIA waxay ka rebayaa (xisaabta) gurigaaga iyo hantida muhiimka u ah guriga. "Waxa muhiimka u ah guriga" macnaheedu waa qayb

kamid ah hantida gurigaaga oo aan si gooni ah loo iibin karin. Si kale haddii loo dhigo, EIA kaama filayso inaad iibiso gurigaaga.

Haddii, si kastaba ha ahaatee, aad guri ku leedahay dhul ballaaran, EIA waxay ku waydiin kartaa inaad iibiso qayb kamid ah dhulkaaga ee aan muhiimka u ahayn guriga. EIA waxay ku siin doontaa ilaa afar bilood inaad ku iibiso hanti kasta oo dheeraad ah. Waqtigaas waxaa laga yaabaa in lagu kordhiyo xaaladaha qaar si looga fogaado dhibaato aan loo baahnayn.

Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad dib u bixiso qayb ka mid ah kaalmada ay EIA ku siisay haddii aad iibiso ama aad wareejisid lahaanshaha gurigaaga. EIA ayaa saari kartaa gurigaaga xanibaad ay kaaga soo horjeedo. EIA kuma qasbi doonto inaad iibiso gurigaaga. EIA waxay u baahan kartaa lacag celin haddii:

- EIA ay bixiso qarashka amaahda guriga aad kuqaadatay(deynta);
- EIA ay bixiso dayactirka yar ee guriga kasoo ka badan \$200 sanadkii;
- EIA ay bixiso kharashka dayactirka weyn ee guriga;
- EIA ay bixiso canshuuraha lagugu lahaa ee sanadadii hore (canshuurta dib u dhaca); ama
- EIA ay ku siiso lacag dheeraad ah

Haddii aad leedahay baabuur:

Guud ahaan, EIA ma bixin doonto kharashaadka la xidhiidha hawlgalka ama dayactirka baabuurka. Laakiin, maaha inaad iibiso gaadhigaaga.

Haddii aad leedahay hanti dareere ah:

Hantida dareeraha ahi waa lacagtaada gacanta ku jirta ama shay aad si fudud ugu bedeli karto lacag caddaan ah, sida lacagta bangiga/ururka amaahda, sanduuqa wadaagga ah, GICs, curaarta ama saamiyada. Waxaa jira hanti dareere ah oo aad haysan karto. Waa inaad u sheegtaa shaqaalaha (EIA) hantida dareeraha ah, **xitaa haddii aad xaq u leedahay inaad haysato** .

Waxaad heli kartaa:

- Ilaa \$4,000 qofkiiba ama ilaa \$16,000 qoyskiiba. Lacagahaas waxaa ku jira qiimaha lacagta caddaanka ah ee siyaasadaha caymiska nololaha, qorshooyinka Aaska/duugista ee horay loo bixiyay, hawlgabka iyo RRSP's(Qorshaha Keydka Hawlgabka ee Diiwaangashan). Markaad xisaabinayso hantida dareeraha ah ee

aan lagaa dhaafay (laguu ogolyahay), waxaad eegaysaa qoyska guud ahaan ee ma eegaysid qof kasta gaar ahaan. Tusaale ahaan, qoys ka kooban afar qof oo hal qof haysto \$5,000.00, mid kalena uu haysto \$3,000.00, labada soo hadhayna midkiiba uu haysto \$4,000.00. Hantidaas waxay hoos imaneysa wadarta guud ee qoyska laga dhaafay \$16,000.00. Sidaa darteed, qofka haysta \$5,000.00 maaha inuu iska jaro \$1,000.00 hantidaas si uu ugu qalmo EIA.

Waxyaabaha kale ee ka baxsan hantida:

- Qiimaha guriga aad ku nooshahay, oo uu ku jiro dhulka muhiimka u ah gurigaaga;
- Waxyaabaha gaarka ah ee aasaasiga u ah caafimaadkaaga iyo badqabkaaga, oo ay ku jiraan alaabta guriga iyo dharka;
- Ilaa \$100 hadiyado qofkiiba, hadii aad aqbashay intaad ku jirtay kaalmada. Waa inaad si joogto ah u helin hadiyadahaas.
- Ilaa \$500 bishii haddii aad naafo tahay. Hadyada waxaad uheli karaa si joogto ah;
- Alaabta iyo qalabka aad u baahan tahay si aad u sii aad uhirgalisid shaqada beeraha ama ganacsiga;
- Koontada kalsoonida ilaa \$40,000, oo loo hayo ilmo ku tiirsan ama ilmo labadiisa waalid ay dhinteen, hadii ilmuhu si buuxda ugu tiirsan yahay qof kale si uu uhelo baahiyaha aasaasiga ah. Lacagtan waxa laga dhaafay kaliya haddii: (1) shuruudaha ammaanadu ay qoraal tahay,
(2) Aysan jirin hanti aan lagasaarin koontada kalsoonida iyada oo aan oggolaansho laga helin agaasimaha Kaalmada Shaqada iyo Dakhliga, iyo
(3) Hantida ammaanadu waxay ka timaaddaa magdhow lagu bixinayo dhaawaca shakhsi ahaaneed ama dhimashada waalidka ama dhaxalka waalidka;
- Koontada aaminaadda ilaa \$200,000 (iyo wixii dulsaar ah ama kobaca qaddarkaas), oo loo hayo qofka naafada ah;
- Lacagaha dawladda dhexe sida magdhowga HIV(Cudurka aydiska);
- Xisaabaadka dhismaha hantida, sida Qorshayaasha kaydka waxbarashada ee diwaangashan, xisaabaadka horumarinta shakhsiga, iyo xisaabaadka hoos yimaada barnaamijyada la midka ah ee uu ansixiyay wasiirku iyo lacagta lagasoo saaray xisaabaadka noocaas ah si degdeg ah loogu isticmaalo ujeedada xisaabtaas;
- Lacag bixinta dayactirka guriga**;
- Qiimaha Noloshu, canshuurta iyo amaahda ee Manitoba iyo qiimaha Canshuurta Guryaha Manitoba**;
- Lacag bixinta GST Credit(Amaadha canshuurta aklaabta iyo adeega)**;
- Lacag, aan ahayn taageerada caadiga ah, ee lasiiya qof baahiyo dheeraad ah qaba**;
- Mushaharka iyo lacagaha carruurta dhigta dugsiga waqtiga buuxa **;

- Lacagaha qolka iyo boodhka (70% laga helo booddka iyo 10% laga helo qolalka)**;
- Qarashka ka-qaybgalka kafaala-qaadka barnaamijka shaqo-barashada ee ay dawladdu ogolaatay**;
- 30% wadarta lacag bixinta billaha ah ee uu helo qofka bixinayo xanaano maalmeedka qoyska, qoskaas oo haysta aqoonsiga waafaqsan ee hoos imaada Barnaamijka Xanaanada Carruurta ee Manitoba**; iyo
- Lacagta bilowga ah iyo deeqaha ay helaan bixiyeyaasha xanaanada maalmeedka qoyska ee hoos yimaada Barnaamijka Xanaanada Carruurta ee Manitoba.**

Hantida kor ku xusan ee leh Calaamadaas "****" waxaa la dhaafayaa kaliya haddii aysan gacantaada ku jirin wakhtiga aad codsanayso gargaarka. Fiiri qaybta xigta si aad u aragto sida hantidan loo maamulo.

Waxaa jira kuwo kale oo badan oo laga dhaafay(La ogolyahay in la haysto). Waxaad dib u eegi kartaa liiska buuxa ee qaybta 8 ee Xeerka Caawimada ee Xeerka Kaalmada Manitoba ([halkan](#)) ama la hadal shaqaalaha EIA.

Dakhli aan la kasbanin intee la'eg ayaan haysan karaa?

Dakhliga aan la kasbanin waa dakhli aad hesho oo aan ahayn mushahar ama dakhli saafi ah oo ka soo gala beer ama ganacsi. Tan waxaa kujirakara lacag kasta oo aad ka heshid caawimadda ilmaha ama amarada masruufka xaaska, amarrada maxkamadda, go'aammada furriinka, dhaxalka, caymiska nolosha, sheegashooyinka shilalka, Caymiska Shaqaalaynta ee saafiga ah, hawlgabka (ay ku jiraan CPP, OAS, iyo nooc kasta oo hawlgab ah). Waxaad haysan kartaa dakhliga aanad kasban oo kamidka ah waxyaalaha kor lagu soo sheegay taas oo hoos timaada " hantida kale ee kabaxsan/lagasoo reebayo."

Haddii aad wax lacag ah ka helayso ilaha dakhliga aan la kasban (ama kuwa leh calaamadaan "****" ee qaybta hore) Xiliga aad codsanayso EIA, lacagta ka badan qadarka hanti-dhaqaale ee dareeraha ah waxaa loo tixgelin doonaa khayraad aad isticmaali kartid.

Ka dib markaad hesHID kaalmada bulshada, dakhliga la helo waa laga dhaafi doonaa bisha la helay. Taas ka dib, ilaa afar bilood ka dib helitaanka dakhliga laga dhaafayo, lacagaha ayaa laga yaabaa in lagu ogolaado inaad ku bixisid lacag ka badan bixinta hantida dareeraha ah. Kordhinta ilaa hal sano ayaa la samayn karaa. Marka muddada ka-dhaafitaanku dhammaato, dakhliga soo hadhay wuxuu ku xiran yahay xadka hantida dareeraha ah.

Qarad Intee la eg baan ka haysan karaa mushaharkayga ama lacagta shaqada?

- Haddii aad ku jirtay wax ka badan hal bil, ilaa \$200 ee dakhliga saafiga ah bishii iyo 30% ee haragaaga. Dakhliga saafiga ah ee bishiiba waa tirada aad ka heshid cidda aad ushaqeysid taas oo ka yar waxa laga jarayo sida cashuurta iyo CPP.

TUSAALE: Dakhligaaga saafiga ah ee bishii waa \$320.00

$\$320.00 - \200.00 ka reeban aasaasiga ah = $\$120.00$

30% ee $\$120.00 = 0.30 \times \$120.00 = \$40.00$

$\$200.00 + \$40.00 = \$240.00$

$\$240.00$ waa tirada aad bishiiba ka ilaalin karto mushaharkaaga ama lacagta shqada.

Haddii aad ku jirtay wax ka yar hal bil, waxaad haysan kartaa ilaa \$200 oo dakhliga saafiga ah bishii.

Haddii aad tahay ilmo aadna tahay arday waqtiga buuxa ah, waxaad haysan kartaa dhammaan dakhligaaga bishii. Tani waxay khusaysaa oo keliya lacagta la kasbaday *ka dib marka* codsiga kaalmada la gudbiyay. Qadarka lacagta la kasbaday ka hor inta aan codsiga la gudbin, fadlan eeg qaybta hore.

NOOCYADA GARGAARKA LA HELI KARO

Guriga

Intee in le'eg ayaan kaalmo ka heli karaa si aan guri ama qeyb-guri u kireeysto?

EIA waxay raacdaa tilmaamaha guud markay timaaddo go'aan ka gaadhista inta ay kuu siini karto kiro ahaan. Qadarka aad helayso waxay ku xidhan tahay tirada qoyskaaga. markastoo qosy kagu badanayhay, wax badan oo kiro ah ayaad helayso. Tusaale ahaan, lacagta la ogol yahay ee hal qof ee suuqa gaarka ah waa \$616 oo ay ku jiraan agabka. Qiimaha lix qof waa \$1,308. Haddii aad u malaynayso in degaanka aay ku filnayn qoyskaaga, kala hadal arrintan shaqaalaha kiiskaaga.

Bixinta Debaaji(lacagat ilaalinta):

Debaaji amniga waa lacagta uu kireeyahaaga kaa codsado inaad bixisid ka hor intaadan bilaabin kirada. Qaddarka lacagta waxay noqonaysaa kaliya ilaa kala barka kirada bishii. EIA waxay kaa dhiibikarta debaajiga amniga marka ugu hore, laakiin waxay kaa fileysaa inaad kii hore u isticmaashid debaajigaga cusub haddii aad guurtid.

Caadi ahaan, waxaad dib u helaya deebaajigaaga 14 maalmood gudahood marka heshiiskaaga kirada uu dhammaado. Mararka qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad dib u helin deebaajigaaga, tusaale ahaan haddii aad ka tagtay guri ama hoy aan la nadiifin ama haddii aadan dayactir ku sameyn dhibaataada aad u geystay gurigaaga ama guriga qeybta ah. Haddii aadan ku raacsaneyn kireeyahaaga diidmada inuu kuu soo celiyo deebaajiga, waxaad u tagi kartaa **Laanta Kirada Guryaha. Laantu waxay dhexdhexaadin kartaa khilaafka idindhaxeeyo kireeyahaaga.** Eeg qaybta IIaha xogtaD bogga 40 si aad u heshid macluumaadka xiriirka Laanta Kirada Guryaha.

EIA waxay kugu dallici kartaa deebaajigaaga labaad haddii ay mar kale bixiyaan sababtoo ah ma aadan sooceshan deebaajigii ugu horeeyay. EIA waxay kaa jari doontaa qadar bille ah miisaaniyadaada ilaa inta deebaajiga oo dhan dib looga helaayo.

Goormaa kirada si toos ah loo siinayaa mulkiilaha?

Mararka qaarkood EIA waxa laga yaabaa inay ku bixiso xaqa kirada mulkiilaha haddii:

- Aad qoraal ku waydiisatay in sidaas lasameeyo;
- mulkiilaha aya ku waydiistay in la sameeyo adigana qoraal ayaad ku ogolaatay;
- laba toddobaad ama in ka badan ayaad kira bixinta dib uga dhacday sidaas daraadeed ayaad heshiis qoraal ah ugashay.

Maxaa dhacaya haddii aad guri leedahay?

Haddii aad leedahay guri adiga kuu gaar ah, isla markaana guud ahaan kharashka amaahda guriga, faaiidada iyo canshuuraha saafiga ah ay noqonayso mid lamid ah sida adigoo guri kiraystay, EIA waxay kaa caawin kartaa inaad bixisid amaahda guriga halkii ay kaa dalban lahaayeen inaad iibiso gurigaaga oo aad kiraysato guri.

Sida ku xusan bogga 15, EIA waxay dooneysaa inay lacagta ay ku bixiso caawimada amaahda guriga iyo arreerada canshuuraha dib ugu soo celisid marka aad gurigaaga iibiso. Waxay hubin doonaan bixinta lacagtaas iyagoo guriga saaraya xanibaad.

Maxaa dhacaya haddii lagugu leeyahay canshuur baaqi kugu ah?

EIA waxay kaa bixin doontaa canshuuraha baaqiga kugu ah kaliya haddii aad ku dhowdahay inaad lumiso gurigaaga, islamarkaana gurigaagu leeyahay qiimo oo uusan u baahneyn dayactir qaali ah. Haddii aad iibiso gurigaaga, EIA waxay ka filaneysaa inaad dib u bixisid lacagtaas iyagoo xanibaad saaraya gurigaaga.

Maxaa dhacaya haddii gurigaagu u baahan yahay dayactir?

Haddii gurigaagu u baahan yahay dayactir, EIA ayaa ku caawin karta. EIA waxay bixin doontaa kharashka "Dayactirka Yar". Dayactirka yar waa dayactir qiimihiisu ka yaryahay \$200 sanadkii. waxaa ka mid ah hawlaha ilaalinta iyo dayactirka sida nadiifinta foornada, nadiifinta tuubada qashinka, iyo nadiifinta dhinacyada saqafka.. EIA ma filayso in dib loogu soo celiyo dayactiradan haddii aad iibisid gurigaaga.

